



Midab kala sooca Guryaha

Housing Discrimination

Waa maxay qeybaha midab takoorka ee ka soo horjeeda sharciga?


Minnesota gudaheeda ma jiro qof kugula dhaqmi karo si ka duwan (sharciga) xalaadda guryaha ayaga oo kuu arkaya:

- Qolo
- Jinsi (lab/dhadig)
- Midab
- Diin
- Xaaladda qooyaska (uur ama in aad caruur badan leedahay)
- Kaalmada dadweynaha (MFIP, GA, SSI, iwm)
- Kala doorbidasho jinsi
- Xaalad guur (aan wali guursan, garoob iwm)
- Curyaanimo
- Qoowmiyad ahaan
- Da' (waxay qusaysaa St. Paul kaliya)
- Caqiido

Waa maxay tusaalooyinka caadiga ee midab takoorka?

Arjiga oo lagu diido

- Markii aad telefoonka wacdo, oo lagu yiraahdo guriga waa uu banaan yahay, laakiin markuu mulkiilahu arko midabkaaga (oo uu yiraahdo "waa hore ayaa la kiraystay").
- Mulkiiluhu markuu yiraahdo ka kirayn mayno "MFIP" ama "(qof) Weelfeer qaata@
- Haddii lagugu diido curyaan ayaad tahay, curyaanimadu kaama horjoogsan karto in laga kireeyo (guriga).
- Mulkiiluhu haddii uu yiraahdo caruur ma ogolin, guriga waxaa degan oo kaliya dad waaweyn (senior) ama qofka guriga leh ayaa degan.
- Maamulaha guriga aad ijaarato dadka siyaabo kala duwan ayuu ula dhaqmaan. Tusaale, dadka qaata cayrta waxaa laga rabaa dakhli 3 jibaar ka badan kan ijaarka, laakiin waxaas uma ay sheegaan qofka shaqaysta.
- Arjigaaga marna lama socodsiinayo.



U kala eexasho

- qofka guriga daryeela (caretaker) in uu marka hore u dayactiro guriga qofka cad inta uu san kaalmeyn qofka midabka leh marka hore.
- Maamulaha (dhismaha) wuxuu si xun u dhibaa qofka midabka leh (oo kaliya) haddii uu ku xad gudbo heshiiskii kirada.
- Milkiilaha waxba kama baddalayo sida ay wax yihiin si u ugu dhaafo qof itaaldaran in uu si fiic meesha ugu noolaado. Sida in uu dhaafo wehel xayaawaan guri-joog.
- Waxaa jira xeerar qaasa oo caruurta ay leeyihiin.
- Maamulaha guriga waxa kaliya ee uu ku tusayaa guryo la ijaarto ee xaafadaha qaarkood ku yaalla.

Xad gudub (Harassment)

- Haddii qofka guriga daryeelo (caretaker) kugu qasbo in aad balamiso (xodxodasha ahaan), gurigaagana uu usoo galo (arintaa awgeed).
- Waardiyaha dhismaha uu martidaada ula dhaqmo si ka duwan kuwa kale aan la jinsiga aheyn.

- Haddii dariska ay isku dayaan in ay xaafada kaa eryaan (saaraan) ayaga oo isticmaalaya ereyo midab takoor ah ama cabsi gelin ah.

Maxaan ka sameyn karaa?

Haddii lagu diido (in lagaa kireeyo) guri, aanad dareento in laguugu diidayo midab takoor (owgii), isla markiiba u qaylo dhaanso kaalmo. Waxaad kale oo waydiisan kartaa qof kale oo aad taqaan in uu waco mulkiilaha (landlord) oo uu waydiisto guri, markaa eeg sida uu ula dhaqmo qofka kale. Tusaale, haddii aad dareento takoor ku salaysan midab, eeg in qof cadaan ah sidaada si ka duwan in loola dhaqmay.

Haddii meeshaad degan tahay si xun lagugula dhaqmo ama lagugu xad gudbo, waa in aad warqad (cabasho ah) u qortaa mulkiilaha. Nuqulna (koobina) ka reebo. Waa in aad heysataa wax cadeynaya midab takoorka (in uu jiro). Isku day in aad marqaati arkayey (waxaa lagugu sameynayo) aad haysataa. Mar kasta oo wax dhacaan waa in aad qortaa. Haddii takoorka uu san joogsan, ama uu sii fogaado, (cid) ku kaalmeeyso waco.

Dacwo xareyn iyo hay'ada loo dacwodo

Waxaad bilaabi kartaa kiis maxkamadeed si aad u joojiso takoorka ama (magdhaw) lacageed u hesho waxyeeladii (ku soo gaaray). Haddii aad wax ka qabasho isla markiiba ah u baahan tahay in laga qabto gurigii lagu diiday, ama in aad joojiso xadgudub, ama aad ka hor tagto si aan guriga lagaaga saarin waa in aad kiiska maxkamadda geyso ayaa ah sida ugu haboon (oo aad sameyn karto). Haddii uu dhaqaalahaaga hooseeyo, waxaad wacdaa xafiiska sharciga dadka ka kaalmeeyo (Legal Aid) ee xaafadaada ku yaal (ama kuugu dhow).



Haddii aad degan tahay magaalooyinka mataanaha ah (Minneapolis iyo St. Paul) iyo inta ku xeeran waxaad wacdaa Kuwa sharciiga (dadka) ka kaalmeeya mashruuca sharciga takoorka guryaha (Legal Aid Housing Discrimination Law Project) (612) 334- 5970 ama (Housing Equality Law Project) (651) 222-4731.

Waxaad kale oo u dacwoon kartaa wakaaladaha dowladda ee sharciga takoorka guryaha fuliya. Waxay kuu baarayaan kiiskaaga, ayada oon wax kharash ah kaaga bixin. Haddii ay helaan wax takoorid ah (in ay jirto) waxay isku dayayaan in la xaliyo. Haddii xalka lagaari waayo, doowladda ayaa waxay xaraynaysaa kiis (dacwo ah) oo lid ku ah qofkii (midab) takoorka sameeyey. Wakaaladaha doowladda waxaa kamid ah:

Housing and Urban Development

77 West Jackson Boulevard
Chicago, IL 60604 - 3507
Tel. (1-800) 424-8590
TDD: (1800) 543-8294

Minnesota Department of Human Rights

190 East 5th Street, Suite 700
St. Paul, MN. 55101
Tel. (651) 296-5663
TDD: (651) 296-1283

Waxaad sameysaba, dhaqsa u samee. Noocyo badan, ayaad u baahan tahay in aad u xerayso dacwadaada ama kiiskaaga hal ama labo sano gudahood.